Talo wanaagsan oo ku saabsan ka hortagga dabka ka kaca qaybaha qolalka

Warqaddaan qoran waxaa loogu talogalay dadka guryaha iska leh, shirkadaha guriyeynta iyo dadka kireysteyaasha ah ee jecel in ay wax badan ka ogaadaan sida looga hortago dabka loona abuuro daad gureyn nabdoon haddii uu dab dhaco.

Meelaha sida degdegta ah looga baxo

Waxa aasaasiga ah ee looga baahan yahay in dhisme dadku ka baxaan waa in ay jiraan ugu yaraan labo meelood oo si degdeg ah looga baxo oo madax bannaan. Haddii hal meel oo laga baxo uu dab xannibo markaas meel kale oo laga baxo waa in ay jirtaa. Dhismeyaasha leh ugu yaraan siddeed dabaq jaranjarada waxaa badanaa loo isticmaalaa mid ka mid ah meelaha degdegta looga baxo, isla markaana dariishadaha, halkaasoo ay adeegyada samatabixintu dadka uga caawin karaan iney ka daad gureeyaan iyagoo isticmaalaya jaranjarooyinka guryaha lagu fuulo, ayaa noqon kara meel kale oo laga baxo.

Dhismeyaasha leh in ka badan siddeed dabaq waxaa badanaa jira hal meel si degdeg ah looga baxo taasoo meel dhigta dalabyo gaar ah oo ku aaddan naqshadda jaranjarada guriga si looga hortago faafidda qiiqa iyo gaasaska. Si galaangal loogu yeesho jaranjarada hal irid, iyadoo dheeraad ku ah iridda qolalka, waa in la maraa. Waa waxa ugu muhiimsan in iridda loo maro jaranjarada guriga si adag loo xiro oo ay u dhammeystiran tahay, in uu irid xiruhu sidii loo baahnaa u shaqeynayo iyo in qataarku si adag oo ammaan leh u qabsamayo.

Meelaha sida degdegta ah looga baxo waa in ay mar walba bannaanaadaan oo aan wax shay ah la dhigin iyo waxyaabaha guban kara, waana taas sababta bushkuleetiyada, kuraasta dadka lagu riixo, jaraa'idka iyo sanaadiiqda aan loo dhigeyn jaranjarooyinka guriga, xataa si ku meel gaar ah.

Waddooyinka awood loo yeelan karo

Guryaha qaarkood waxay leeyihiin waddooyin awood loo yeelan karo oo dheeraad ah iyadoo ay shuruud u tahay oggolaansho qorsheysan isla markaana waddooyinkaan awoodda loo yeelan karo waxay lagama maarmaan u yihiin haddii ay dhacdo daad gureyn iyo dab demin. Waddooyinkaan awoodda loo yeelan karo waa in si wanaagsan loo calaamadeeyaa, laga ilaaliyaa wax xannibaad ah barafkana laga xaaqo waqtiga bilaha qaboobaha

Qolalka dhulka hoostiisa iyo kuwa guriga dushiisa ku yaal

- Meelaha looga soo baxo qolalka dhulka hoostiisa iyo qolalka dusha sare waa in aan waxna lagu xannibin iyo walxaha guban kara intaba.
- Gaasaska iyo dareerrada guban kara ama walxaha qarxa waa in lagu kaydin qolalka dhulka hoostiisa iyo kuwa dusha sare.
- Irridaha laga galo qolalka dhulka hoostiisa iyo kuwa dusha sare waa in ay xiran yihiin oo la qufulo.
- Isku urursanaan wanaagsan iyo nidaamsanaan waa in ay jirtaa si gacan looga geysto ka hortagga dabka.

Xusuusnow in dab qabadsiinta inteeda badan ay ka dhacdo qolalka dhulka hoostiisa, qolalka qashinka, jaranjarooyinka guriga iyo dusha sare. Kuwa guryaha dabka qabadkiisa dibedda isaga ilaali!

Brandskyddsföreningen

Qalabka ka hortagga dabka

Qaybaha qolalka guryaha intooda badan ee waddanka ku yaala waxay leeyihiin qalab ka hortag dab oo ku rakiban. Kuwaan waxay noqon karaan, tusaale ahaan, macdanka qiiqa yareeya ama marwaxadaha oggolaada daad gureynta dabka iyo qiiqa ka imaanaya jaranjaroyinka guriga, qolalka dhulka hoostiisa iyo garaashyada, ama marinnada si loo fududeeyo in adeegyada samatabixintu ay biyaha meesha u mariyaan.

Qalabka kor lagu soo sheegay waa in la kormeeraa waqtiyo joogto ah oo kala duwan iyadoo feejignaanta la siinayo shaqada uu qabto, calaamadda iyo waxyeello suuragal ah oo uu leeyahay. Waa hawl u taal cidda iska leh guriga/shirkadda guriyeynta in ay kormeeraan qalabka.

Muxuu sharcigu leeyahay?

Marka laga eego sharciga (2003:778) ee ka hortagga shilalka 2 faqraddiisa 2 § ”milkiilaha ama qofka guriga deggan waa in ay haystaan qalabka dabka lagu demiyo iyo badbaadinta nolosha marka uu dab jiro ama shil kale iyo sidoo kale in ay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in laga hortago dabka ama la xaddido waxyeellada/dhaawaca ka imaanaya dabka”.

Iyadoo kooban, waxa kor lagu soo sheegay macnahoodu waa in kireysteyaasha/milkiilaha qolalku ay mas’uul ka yihiin in ay raacaan sharciga. Dadka deggan waa in ay raacaan sharciyada ku dabbaqmaya dhismaha laga hadlayo isla markaana milkiiluhu waa inuu xaqiijiyaa in sharciyada la dejiyey iyo in qalabka ka hortagga dabka la kormeeray oo la dayactiray.

Qaylo dhaamiyeyaasha qiiqa

Waxaa jira warqad qoran oo talo bixin oo gaar ah oo ku saabsan qaylo dhaamiyeyaasha qiiqa oo uu daabacay Ururka Ka Hortagga Dabka ee Swedish-ka ah.

Wakaaladda Adeegyada Samatabixinta Qaranku waxay sidoo kale daabacday talo ku saabsan qaylo dhaamiyeyaasha qiiqa ee guryaha la deggan yahay (2007:1). Eeg *www. brandskyddsforeningen.se* iyo *www. msbmyndigheten.se* si aad macluumaad dheeraad ah u heshid.

Qaylo dhaamiyeyaasha qiiqu waxay badbaadin karaan noloshaada. Xaqiiji in aad mar walba guriga ku haysatid qaylo dhaamiyeyaha qiiqa.

MAR KASTA WAC 112 HADDII UU DAB KU QABSADO

Ururka Ka Hortagga Dabka ee Swedish-ku waa xubin ururro badan oo ka shaqeeya in ay Sweden ka dhigaan meel ammaaan ah. Iyadoo loo marayo macluumaad bixin iyo tababar ayaan dadka, shirkadaha iyo ururrada ka caawinnaa iyo mas’uuliyad iska saaraan ka hortagga dabka. 08-588 474 00. www.brandskyddsforeningen.se

165550/2009

Brandskyddsföreningen